

Arimaha Kiraysiga:

Landlord: Waa qofk guriga lehe ama masuul ka ah

Tenant: waa qofka guriga kireysanya ama guriga ku jira.

Marka aad kiraysanayso qolal ama guri, gofka degaya guriga waxaa laga rabaa in uu saxeeexo heshiis kiro si loo dhawro qofka kiraysanya iyo kan laga kiraysnayaba. Heshiiska kirada qofka kiraysanya gurigu wuxuu ka mas'uul yahay arrimahan soo socda:



- Deebaaji – Waa lacag la siiyo qofka laga kiraysanayo guriga oo loo siinayo in uu u haysto deebaaji si uu ugu kabo tacadiga haddii qofka kiraystay uu bixin waayo kirada ama lagu nadiifiyo dhismaha marka qofku ka baxo guriga oo uu wasakh uga tago ama wax ka jebiyo.
- Bixinta gaaska/layrka iyo teleefoonku kuma jiraan kirada bisha, waxaana la rabaa in gooni loo bixiyo.
- Ogaysiiska Guri Ka Bixida – waxa laga rabaa kireystaha ogaysiis qoraal ah in uu siiyo qofka laga kiraystay guriga muddo 30 cisho ah, ka hor mudada uu guurayo. Waxaa lagu talinayaa in kireystuhu koobi haysto.
- Kireystuhu isaga ayaa kamasuul ah inuu bixiyo kirada waqtiga laga rabo.
- Kireystuhu isaga ayaa ka masuul ah inuu guriga nadiifiyo, hagaajiyo, kana dhowro in aan la burburin.
- In aan la rabshin oo aan laga caraysiin dariska.

Dhibaatooyinka Guriyeynta

- Dayac-tirka - qofka guriga leh waxa laga rabaa in uu guriga ka dhigo mid nabadgalyo iyo nadaafad leh. Kireystaha, waxaa laga rabaa in uu si hufan u fahmo xaquuqdiisa. Kireystuhu waa in uu la socodsiiyaa qofka guriga leh wixii hawl ah oo u baahan in si dhakhso ah loo hagaajiyo. Tusaalayaal ku saabsan waxyaalaha laga rabo in uu dayac tiro qofka guriga lihi waxaa ka mid ah: in uu sameeyo tuubooyinka darooraya, in uu hagaajiyo aalada dabka urisa, in uu ka buufiyo guriga cayayaanka, iyo in uu rinjiyeeyo darbiyada dheehu ka dhacay.
- Cayrinta – Waxaa sababa arrimahan soo socda:
 - kirada oo la bixin waayo
 - Xaquuqda Kirada oo lagu xadgudbo
 - Guriga oo la burburiyo.

Ogeysiis: Waxaa lagu siinayaa nuqulka warqadaha aad ku gashay heshiiska kirada. Nuqulkan ku xafido meel fiican. Waa in aad fahamtaa waxa ku qoran. Adeegahaaga ayaa kaa caawin kara in aad fahamto warqadan waxa ku qoran. Fadlan weydii.